Dhambaal

CADDAD GAAR AH

DHAMBAAL WAA WARGEYSKA CODKA SHAQAALAHA EE KA SOO BAXA XIRIIRKA GUUD EE U.SH.SOOMAALIYEED 3dii BILOODBA MAR

Taariikh, 27/4/88 - MUQDISHO/Somalia

HAMBALYO

Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, isagoo ku hadlaya Magaca Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe XHKS, kan Golaha Dhexe, Golaha Shacbiga, Golaha Dowladda, kan Shacbiga Soomaaliyeed iyo kiisaba wuxuu dhambaal hambalyo ah oo ku aaddan Shirweynaha 3aad ee XGUSHS, Sannadguurada 11aad ee XGUSHS iyo Maalinta Shaqaalaha Adduunka ee 1da Maajo awgood shaqaalaha Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan u soo gudbiyey, wuxuuna u rajeynayaa inay sannadkan kiisa kale ku gaaraan guul, horumar, baraare, kuna guuleystaan halgankooda dabaqiga ah oo ay ugu jiraan kobcinta dhaqaalaha iyo dhismaha dalkooda hooyo oo hagaajinta noloshooda ku xiran tahay.

HAMBALYO

Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururrada
Shaqaalaha Soomaaliyeed Jaalle Maxamed
Faarax Ciise "Gaashaan"

Guddoomiyaha XGUSHS, Dr. Maxamed Faarax Ciise «Gaashaan» hambalyo kal iyo laab ah u gudbinayaa Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, isagoo ku bogaadinaya sida geesinnimada, naftihurnimada, waddaniyad jaceylka leh ee goor walba uu ugu hoggaaminayo ummaddiisa gaaritaanka nolol baraare iyo barwaaqo leh, isagoo mar walbaba hiil hagar la'aaneed u fidiya shaqaaleweynaha Soomaaliyeed.

Guddoomiyuhu wuxuu munaasabadaha is biirsaday (Shirweynaha 3aad ee XGU Shaqaalaha Soomaaliyeed, 11 guurada Xiriirka GUSH Soomaaliyeed iyo 1da Maajo Maalinta shaqaalaha adduunka), dartood Xoghayaha Guud u rajeynayaa cimri dheer iyo caafimaad qab waara wuxuuna magaca shaqaaleweynaha Soomaaliyeed ku leeyahay «Na Hoggaami Siyaad — Nabee Nooma Talin Maskax Nooga Roon, Nacabkaa Ha Jabo, Noolow Siyaad».

GUDDIGA WARGEYSKA DHAMBAAL

1. Jaalle Dr. Maxamed Faarax Ciise «Gaashaan».

2. Jaalle Cabdulqaadir Cabdi Calasow
3. Jaalle Dr. Cismaan Ayaanle Maxamuud
4. Jaalle Dr. Isaaq Khaliif Faarax
5. Jaalle Drs. Sucaad Cab/siis Maxamed
6. Jaalle Dr. Cabdulqaadir Suufi Axmed
7. Jaalle Dr. Cali Sheekh Cabdullaahi Yalaxow

ISKU DUBBARIDIDDA:
Jaalle Maxamed Xuseen Eenow

TUSMADA BUUGGA

1. Taariikhda Halganka Shaqaalaha Adduunka _____ 1

2. Taariikhda Halganka Shaqaalaha Soomaaliyeed _____ 3

3. Heshiiska Soomaaliya iyo Itoobiya _____ 4

4. Barnaamijka Deriseynta iyo Kaalinta XGUSS _____ 5

5. Kaalinta XGUSS iyo Barnaamijka Howlgalka Xisbiga iyo Kacaanka Toosinta _____ 9

6. Xiriirka Dibedda ee XGUSS _____ 11

7. Hayaan (Hees) _____ 14

8. Ma Ogtahay _____ 15

9. Yaa Noqon kara Hoggaamiye Shaqaale 16

ARAAR

Soo saarkan labaad ee Wargeyska Dhambaal ee Codka Shaqaalaha Soomaaliyeed ce Saddexdii biloodba mar soo baxa, wuxuu ku soo beegmay xilli kulmiyey Munaasabado kala duwan oo kala ah: Shirweynaha Xiriirka Guud ee USHS., 1da Maajo ee Maalinta Shaqaalaha Adduunka 11 guuradii XGUSHS oo dhowaan dabbaaldeggiisii la soo gudbay oo weli xuskiisii la wado.

Sidaas darteed waxaa lama huraan noqotay in qaybta labaad ee Codka Shaqaalaha lagu soo qoro dhowr qodob oo loo arkay inay aqoonta shaqaalaha Soomaaliyeed wax ku kordhiyaan, kuwaas oo u kala qeybsan kuwo tabinaya wax horay u dhacay iyo kuwo cusub oo tilmaan guud ka bixinaya dhacdooyinka dalka gudihiisa ka jira, sida deriseynta iyo kaalinta shaqaaluhu ka leeyahay, barnaamijka howlgalka Xisbiga iyo Kacaanka Toosinta iyo sidoo kale kaalinta shaqaalaha Soomaaliyeed ay ku leeyihiin heshiiskii dhexmaray Soomaaliya iyo Itoobiya iyo siday u arkaan Shaqaalaha Soomaaliyeed iwm.

Qodobbadan aan soo magacawnay ee cusub waxay u baahan yihiin wax ka qabasho iyo taageero aan gabbasho lahayn, maxaa yeelay, haddii aadan wax ka qaban hadba wixii socda ee u baahan fulin deg deg ah, waxaa taariikhdu caddeysay inay tahay waqti iyo awood wax qabad oo kaa dhumay oo aan ku soo mareyn mar kale.

Shaqaalaha Soomaaliyeed waxay ku jiraan sidii ay u horumarin lahaayeen dalkooda, iyaga oo aan eegin dhibaatooyinka ka dhashay suuqa guud ee dalka iyo kuwa adduunka kaleba, waxaanse rajeyneynaa in kan Soomaaliya laga gudbi doono dhawaan, maxaa yeelay waxaa Xisbiga, Dowladda, Shaqaalaha iyo Dadweynaha horusocodka ah ay ku hawlan yihiin sidii loo turxaan bixin lahaa arrimaha hortaagan horumarinta dalka, gaar ahaan nolosha shaqaalaha iyo dadweynaha.

Shaki kuma jiro in Dhambaal uu dareenka Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo Xiriirka wax wada qabsi ee ay la leeyihiin Ururrada Caalamiga ah iyo kuwa Gobaleed ee Adduunka.

Taariikhdii Halgankii Shaqaalaha Adduunka

DAAHIR CALI CUMAR (DEYR)

Dhaqdhaqaaqyadii shaqaalaha adduunku, waxay soo mareen marxalado kala duwan oo aan lagu soo koobi karin qoraal yar, maxaa yeelay waxay si rasmi ah u socdeen 200 oo sano, welina waa socdaan waana socon doonaan inta adduunka ay ka jiraan cadaadis, kala sarreyn, gumeysi, dhiigmiirad iyo hantidii adduunka oo kooxo yar urursadeen oo aan dan ka lahayn jiritaanka inta badan.

Sida la ogyahay 60 — 80kii qarnigii XVIII (18) waxaa dalalka reer Yurub ka bilowday warshado ka duwanaa kuwii gacanta ee lagu magacaabi jiray «Maano Fəktuura», xilligaas oo loo yaqaan «Kacaankii Sancada». Isbeddelkii sancadu wuxuu la yimid dhalashadii abuuritaan shaqaale tiro badan oo urursan iyo hantigoosi deg deg u kobcay. Labadaan qaybood markii ay abuurmeenna waxaa dhashay dagaallo joogto ah oo ay sababo u ahaayeen kooxihii yaraa ee hantidii wada leexsaday.

Iska horimaadyadii waagaas ka dhex qarxay shaqaalihii iyo loo shaqeeyihii, waxay xilliyadii dambe isu beddeleen dhinacyo kale, sida; siyaasadda, dhaqaalaha iyo dhaqanka, maxaa yeelay kooxihii hantidii wada xaabsaday waxay ku darsadeen siyaasaddii oo markii dhaqaalihii iyo siyaasaddii isku darsadeen waxay awood u heleen inay dhinac kasta ka cadaadiyaan guud ahaan dadkii reer Yurub intoodii badneyd, gaar ahaan kuwii ka soo horjeeday oo si fiican u gartay, kuwaas oo ahaa shaqaalaha.

Ilaa laga helay aqoonyahanno leh aragti horusocod oo hoggaamiyey shaqaalihii lama gaarin xeeladihii lagaga guuleysan lahaa cadowga xoogsatada iyo dadweynaha. Muddo 50 sano ku dhow markii shaqaaluhu soo wadeen dagaallo aan cilmiyeysneyn, waxaa Yurub ka soo baxay halyeeyadii ay ka mid ahaayeen K. Markis, F. Angelis iyo kuwo kale.

Halyeeyadii indheergaradka ahaa markay derseen dhibaatooyinkii dabaqadeed ee ka taagnaa bulshadii reer Yurub, waxay isku raaceen in lagaga bixi karo hab ka duwan oo ka horukacsan kii markaas adduunka ka wada jiray oo ahaa hantigoosiga ee dhaliyey dabaqadaha ku kala tegey dhinac kasta oo nolosha saameeya. Si kaas lagu gaarana waxay ku dhaqaaqeen sidii loo kordhin lahaa aragtidii siyaasadeed ee hoggaaminta shaqaalaha, maxaa yeelay waxay ugu muuqdeen in ...da keliya ee dhisi karta siyaasad ka hufan gumeysi. Kala sarreyn. Iska hor imaad ay yihiin shaqaalaha.

1852kii K. Maarkis wuxuu yiri: «Dagaallada shaqaaluhu waa lagama maar-

maan, maxaa yeelay waa kuwa keliya ee burburin kara dhibaatooyinka dabaqadaha burjuwaasiyiinta, waana kuwa keliya ee abuuri kara budsho ka xalan dabaqado colaadi dhex taal.

Dhowr sannadood markii K. Maarkis iyo F. Engelis ay wadeen abaabul shaqaale, waxbarid, tusaaleyn xeelado, iwm., waxay go'aamiyeen in la qoro barnaamijkii lagu wadi lahaa Xisbiga Shuuciga ah ee Shaqaalaha, si dagaallada shaqaaluhu u noqdaan kuwo u socda si cilmi ah oo looga baxo halganka dhalanteedka ah. Si arrintaas ay u fusho, 1848kii, bishii Febraayo waxaa la qoray barnaamijkaas (Maanifesta) oo ku saleysnaa Xisbi Shuuci ah.

1. Qaybta hore ee Manisfesta waxay ka hadleysaa dhaqdhaqaaqa shaqaalaha burburinta hantigoosiga, guuleysiga xoogsatada goor ay noqotaba, dhismaha bulsho aan dabaqo u qaybsaneyn iwm.

2. Qaybta labaad waxaa lagu qoray shaqaalaha iyo habka sharciga ah, waxaa lagu caddeeyey in shaqaaluhu yihiin kuwo awood u leh shaqada bilowgeeda iyo dhammaadkeedaba oo hirgelin kara barnaamijka Xisbiga.

3. Qaybtan waxaa lagu muujiyey hantiwadaagga dhalanteedka ah iyo kan cilmiga ah iyo heerka labaad oo ah Shuuciyadda. Qaybtan waxaa hoggaamiyayaashii shaqaalaha looga digay inay ka taxadaraah hantigoosiga oo mar mar huwada calan hantiwadaag ah si uuu khatalo horusocodka iyo halganka shaqaalaha.

4. Qaybta afraad waxaa lagu soo qaaday Xisbiga Shuuciga ah ee shaqaalaha iyo kuwo ka soo horjeeda ee ay leeyihiin maalqabeenka iyo dowladuhu, waxaa kale ee lagu soo qaaday arrimihii lagaga hortegi lahaa xeeladaha Xisbiyadii Burjuwaasiyiinta iyo boqorradii Yurub inteeda badan u talinayey xilligaas. Qoristii Manifesta wuxuu ku soo beegmay Kacaankii Burjuwaasiga ahaa ee 1848 — 49kii Yurub ka dillaacay. Sanooyinkaas waxaa kacay dadweynihii Yurub ku noolaa iyagoo diiddanaa Talisyadii Dhulgoosiga ahaa, waxayna u dagaallamayeen Baarlamaaniya oo ku shaqeeya Dimuqraadiyad raalli laga yahay.

Xoogsatadii reer Yurub waxay is lahaayeen intii dagaalkii kacaanku uu socday, waxaa la gaari doonaa horumar ka roon kii hore, markii la eego dhinacyada danaha shaqaadaha iyo nolosha guud ee dadweynaha. Hase yeeshee siyaasaddii guud ee reer Yurub waxay u gacan gashay. Burjuwaasiyiintii ay dagaallamayeen.

WAA SOCOTAA

Taariikhda Halganka Shaqaalaha Soomaaliyeed

BARAYAASHA MACHADKA WAXB.
SHAQAALAHA XGUSHS

QEYBTII 2AAD

Muddada 10ka sano ah waxaa qabsoomay laba shirweyne 14 Kaifauhi, waxaana Xoghaynta Guud wax iska beddeleen ugu yaraan 2 jeer oo muhiim ah, marka laga hadlayo in jagada Guddoomiyaha XGUSHS isbeddel ku dhacay. Waxaa kale oo isbeddel sameeyey qaab dhismeedka iyo tirada Waaxyaha Xoghaynta Guud mudadaas, waxaa abaabulka xarakadu gaartay inay ku soo biiraan Urur Shaqaale oo hor leh, kalana ah:- Ururka shaqaalaha ta. Ganacsiga iyo Maaliyadda iyo Maamulka iyo Arrimaha Bulshada.

Shaki kuma jiro in muddadaas xarakada shaqaalaha guulo iyo xisaabtan ay la saanqaadey socodka siyaasadeed iyo dhaqaale ee dalka gudo iyo dibadna abaabul iyo waxqabad loo heli karo raad raac taariikheed oo lagu qiimeeyo heerka la gaaray, sida ay u taabbogaleen waajibaadku ku qeexnaa barnaamijka shaqo ee XGUSHS lagu daro howlgelinta XHKS iyo fulinta qorshayaashii Qaranka ee Dowladda Soomaaliyeed, ka sokow barnaamij-

Dowladda Hoose Dalxiiska iyo Hoteellada iyo Ururka Shaqaalaha Muruqmaalka, ka sokow 6dii Urur Shaqaale ee hore u unkamay abaabul ahaan shirweynihii dib u habeynta XGUSS lagu ansixiyey 1977.

Waxaa kale oo dhawaan dhismay Ururka Shaqaalaha Badmaaxiinta Soomaaliyeed. Ururrada Shaqaalaha ee hore abaabul ahaan howlgalay waxay ahaayeen: Warshadaha iyo Macdanta, Beeraha iyo Xoolaha, Dhismaha iyo Xoogga Korontada, Gaadiidka Isgaarsiinta iyo Warfaafinyada shaqo ee gaar ahaaneed iyo kuwa XHKS ee XGUSS shaqaalaha iyo xoogagga tacabka waxaa horyaalla hirgelin ficilan ah ee qorshaha 5ta sano sida kan lagu gaaray shirweynihii 3aad ee XHKS 1986. Waxaa iyaduna muhiim ah arrinta isucheellitirka daryeelka shaqo iyo shaqaale sida xiriirka mushaharka iyo maciishadda.

Barnaamijyadii waxqabad iyo abaabul ee Kacaanka iyo mintidnimada xoogagga bulshadeed ee isbeddelka u hamuun

qabay waxaa lagu xaqiijiyey horumarin dhaqaale iyo wacyi gelin bulsheed gudo iyo dibadba laga dareemay, wax badanina tusaale ugu taagan yihiin. Shaqadii Siyaasadeed iyo abaabul ee Xafiiskii Xiriirka Dadweynaha (PRO) markii dambena u digo rogtay xafiiska Siyaasadda Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka waxay guul ka soo hoysay dib u habeyntii xoogagga bulshadeed, waxaana unaiashadii AHKS 1dii Luuiyo 1976 ka uib taabo galay Ururka Bulshada ee Haweenka, Shaqada, Dhaqiiyaruda iyo Iskaashatooyinka

Eeg Bogga 8aad

Hoshiiska Soomaaliya & Itoobiya

DAAHIR CALI CUMAR (DEYR

Ilaa bilowgii Qarnigii 16aad Soomaaliya iyo Itoobiya waxaa ka dhex aloosnaa muranno dhaliyey dagaallo sababay geeri aad u tiro badan, burbur dhaqaale, dhaqan iyo siyaasad.

Iska hor imaadyadaas soo jireenka ahaa waxaa abuuray gumeystayaashii reer Yurub ee qabsaday, kalana qeybiyey Qaaradda Afrika, kuwaasoo danta weyn ee ay ka lahaayeen ay ka mid ahaayeen in dalalka deriska ah ayan yeelan xiriir nabadgelyo, si ayan uga bixin gacantooda gumeysiga ku saleysan ee dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha iyo dhaqanka.

Runtii dhibaatooyinka maanta hortaagan iskaashi guud ee dalalka ka tirsan Ururka Midowga Afrika, waa arrinta ku saabsan kala qeybinta, hase yeeshee tii lagu sameeyey Soomaaliya, waxay aheyd tii ugu darneyd. Ilaa 1960kii Ummadda Soomaaliyeed waxay wadday bal sidii xal nabadgelyo oo caddaalad ku dhisan looga gaari lahaa murankii soo jireenka ahaa, hase ahaatee suuragal ma noqon taasi Ilaa 3dii bisha Abriil 1988ka.

Goor Ummadaha ku nool Geeska Afrika iyo adduunka kale ee nabadda jecel loo wada geyfan yahay, bal sidii heshiis nabadgelyo uga dhici lahaa Soomaaliya iyo Itoobiya, waxaa bishii Jannaayo 1986 magaalada Jabuuti shir ku saabsanaa abuurista Ururka la dagaallanka abaaraha iyo nabaadguurka isugu yimid madaxda Afrikada Bari qaar ka mid ah.

Nasiib wanaag intii shirkaasi uu socday waxaa wada hadal ku saabsanaa arrintaas yeeshay labada Madaxweyne ee kala ah; Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo Mingistu Xeyle Maryam.

Labada Hoggaamiye waxay isla qireen dhibaatada jirta iyo in loo baahan yahay nabad ka dhalata Geeska Afrika. Si taas loo gaaro labada dal waxay arrintaasi u saareen Guddi labada dhinac u qeybsanaa, hase yeeshee saddex shir oo lagu kala qabtay Muqdisho iyo Addis Ababa markii uu yeeshay, waxaa caddaatay in la isku mari waayo qodobbadii qolo kasta soo hordhigtay shirka.

In kasta oo aan lagu guuleysan doodihii saddexdaas kulan, haddana dadweynaha Soomaaliyeed iyo Dowladdiisuba waxay adduunweynaha u bandhigeen in wada hadallada la sii wado, si loo helo nabad waarta oo ku dhisan xal caadil ah oo labada Ummadood raalli geliya.

Goor xaal halkaas joogo, waxaa markii labaad bishii Maarso 1988 magaalada

buuti isugu yimid madaxda Afrika Bari, bal si loo eego intuu jiray Ururku wixii u qabsoomay iyo waxa weli ka dhimman. Sidoo kale labada Hoggaamiye Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo Mingiste Xeyle Maryam waxay mar labaad yeesheen dhowr kulan oo ku saabsanaa dhammeystirka iyo xal u helidda dhibaatooyinkii ay wada qireen kuankoodii koowaad.

Si dareenka iyo rabitaanka labada dadweyne loo fuliyo 1dii Abriil 1988 waxaa Muqdisho ka soo degay Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Itoobiya Berhano Bayeh, labadii Abriilna waxaa bilowday wada hadallo labo geesood ahaa. Dood labo maalmood socotay kadib, waxaa labada dal mar soo wada saareen heshiis xuddun u ah nabaddii labada dadweyne sugayeen, kaasoo ay ka mid ahaayeen:

1. In la soo celiyo Xiriirkii Diblomaasiyadeed ee burburay 1977kii.
1. In la kala durkiyo labada Ciidan oo mid kasta ka fogaado 15 kiilomitir xuduudka loo yaqaan.
3. In la is dhaafsado maxaabiista ku kala xiran labada dal.
4. Iyo in la kala joojiyo dicaayadaha iyo wax kasta oo wax u dhimi kara nabadgelyada labada dal dhexmartay.

Waxaa kuwaan wehliyey kuwo kale oo lagu faahfaahiyey afar qodob.

HESHIISKAN SIDEE SHAQAALAHA SOOMAALIYEED U ARKAAN

1. Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu heshiiskaan ugu muuqdaa guul weyn oo cabbirtay dareenkii dadyowga ku kala nool labada dal iyo kuwa ku nool adduunka horusocodka ah ee nabadda jecel.
2. Waxaan heshiiskaan u arkeynaa in uu horseed u yahay iskaashiga labada dal, markii laga eego dhinacyada dhaqaalaha; dhaqanka iyo siyaasadda.
3. Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo guud ahaan dadweynahooduba heshiisku wuxuu ugu muuqdaa in uu furo u yahay horumarinta labada Ummadood oo muddada dheer colaaduhu ka dhex aloosneyd kuwaasoo marna aan kala maarmi karin, markii laga eego dhinacyo kala duwan oo noof kasta garan karo.

Waxaan leenahay, ha guuleysto oo sidii loogu tala galay ha u fulo heshiiska bilowga u ah kan weyn ee soo socda.

Barnaamijka Deriseynta & Kaalinta XGUSS

D/YAARIYE:
DR. BASHIIR MAXAMED JAAMAC

Curashadii kacaanka 21ka Oktoobar. ka hana qaaday geyiga JDS, wuxuu ahaa bog cusub oo taariikheed oo u furmay xoogagga wadaniga Soomaaliyeed, lagaganu bogsooday hagardaamooyin badan ee dahwareeriyey nolosha bulshada ee dhinacya dhaqaalaha, caafimaadka, waxbarashada, siyaasadda, iyo difaaca oo dhammaan abuuray kalsooni darro, xasillooni iyo degganaansho la'aan iyo nababgelyadii oo ciriiri gashay. Si aafooyinkaas looga gudbiyo shacbiga, ayaa ay lama huraan noqotay ku talaabsiga dhismo bulsho caafimaad qabta oo ku dhisan siinnaan iyo caddaalad, beegsaneysana himilo qura ee ah gaaritaan horumar dhaqan dhaqaale iyo mid bulsho oo taam ah.

Si loo xaqiijiyo yoolkaas dadweynaha ayaa lagu dadaalay abaabulka iyo kordhinta wacyiga bulshada oo loo arkay istiraatiijiyadda qura ee lagaga guuleysan karo dib u socodka gudaha iyo dibadda, waxaana la meelmariyey dhismaha iyo habeynta guddiyada difaaca Kacaanka Soomaaliyeed oo waajibkoodu ahaa ilaalinta iyo difaaca mabaadi'da, guulaha iyo miraha kacaanka Oktoobar, laguna gaaray guulo la taaban karo oo lagaga soo gudbay xilliyo qallafsan oo bulshada kala soo gudboonaaday sugidda masiirkooda.

Shaki kuma jiro in socodka waayaha bu shadu uu mar walba la saanqaadayey xaalado badan oo ku milan heerka nolosha iyo halganka loogu jiro higsiga horumar aayotiin leh, kuwaasoo aan marna lagaga fursaneyn in lagu wajaho sida ugu hufan ee saamixi karta inay noqdaan inirò



dhal, una adeegaan maslaxadda bulshada. haddaba, bartamihii bishii Luulyo oo ah mid xusuus ku leh halganka xoogagga horusocodka ee Soomaaliyeed, ayaa ahayd markii Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS uu guddoomiyey dokumentigii taariikhiga ahaa ee barnaamijka howlgalka Xisbiga iyo Kacaanka toosinta, ee nuxurkiisu yahay in si aan ka weecasho lahayn loola beegsado sixitaan min kor ilaa hoos wixii khaldaada ee laga galay ku socodka khadkii iyo mabaadi'da Kacaanka 21ka Oktoobar, waxaana barnaamijka oo ku habeysan wejiyo kala duwan uu kiisii laad la xiriiray dib u soo nooleynta dareenka iyo wacyiga dadweynaha, wejigiisa abaadna, sixitaanka mas'uuliyiinta Xisbiga, Maamulka iyo kala sifeynta xubnaha Xisbiga, iyadoo wejigiisa 3aadna uu ku fogan yahay xogogaal u noqoshada dhibaatooyinka dhaqaale iyo bulsho ee jira.

Haddaba, iyadoo la sii ambaqaadayo almiyadda iyo siyaasadda Xisbigu ka leeyahay dhaqangelinta barnaamijka howlgalka Xisbiga iyo Kacaanka toosinta ayaa XHKS, wuxuu dib u habeyn ku sameeyey guddiyada difaaca kacaanka Soomaaliyeed oo marxaladdan kacaan toosinee lagu magacaabay guddiyada Derisyada dadweynaha maadaama derisku yahay Unugga bulshada, bulsho kasta ka abuuranto midowga qoysas ku wa nool bii'ado qura. isla markaana wadaa waxyaabaha asaaska u ah jiritaanka bulshada sida; caafimaadka, nabadgelyada waxbarashada, dhaqaalaha, dhaqanka wax soo saarka iyo guud ahaan arrimaha saldhig u noqon kara socodka taariikheed ee nolosha.

Barnaamijkan Derisyada oo ah mid ka tarjumaya siyaasadda Xisbiga ee ku wajahan xoojinta iskaashiga, wadajirka iyo urursanaanta bulshada. waxay ujeeldadhisu tahay; ka qaybgelinta dadweynaha dhismaha dalka iyo xaqiijinta himilooyinka horumarineed ee ummaddu higsaneyso.

— La dagaallanka dib u socodka gudaha iyo dibadda iyo ka hortagga fal kasta oo dhaawici kara karaamada iyo jiritaanka bulshada Soomaaliyeed.

— Xoojinta isbaheysiga iyo isbarashada derisyada.

— Sugidda xasilloonida iyo nabadgelyada derisyada.

— Inay guddiyadu u howlgalaan kor u qaadidda wacyiga siyaasiga ee bulshada, iyo dhismaha garaadkooda.

— Habami u qayb gelinta dadweynaha meelmarinta qorshayaasha qaranka ee

ku wajahan horumar gaarsiinta bulshada.

— Ka qayb gelinta dadweynaha howlaha iskaa wax u qabso ee lagu taabbo

— Difaaca gudaha iyo mirata [illegible] gelinnayo degaannada derisyada.

nka 21ka Oktoobar 1969kii.

Barnaamijkan oo ku saabsan dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka JOS waxaa xoogagga ku howlan najixinhisa ka mida shaqaala weynaha Soomaaliyeed oo ah xoogaggii horusocod ee taageerada hagar la'aan goor walba la hareer jooga meelmarinta howlaha baaxadda leh ee lagu hormariyey mustaqbalka dadka iyo dalkaba, waxayna yihiin xarakada hormuudka u ah isbeddelka bulsho ee hanaqaada oo bartilmaameedkiisu yahay u hiilinta inta dulman iyo gaaritaan nolol bulsho oo loo siman yahay oo ay ka maran tahay nooc kasta oo dhiigmiirad iyo isku dulnaalaad ah.

Shaqaalaha Soomaaliyeed oo taariikh aan duugoobin kaga asteysan halganka loo soo maray xornimada iyo waqtiyadii [illegible]kaa ee Kacaanka ka samata bixiyey bulshada Soomaaliyeed, waxay marxaladdan Kacaanka ah ay kaalin horseednimo kaga jiraan barnaamijka deriseynta oo ay si taariikhi ah uga qayb galeen taabbogelinta wejiyadiisii kala duwanaa, waxayna si wax ku oolnimo ah uga qayb qaataan, dadaalka loogu jiro wacyigelinta bulshada, abaabulka, kordhinta heerka aqooneed iyo ololayaasha horumarineed ee ka socda degaannada dalka oo dhan.

XGUSHS, oo dareesan kaalinta hoggaamineed ee kaga beegan mideynta cududda shaqaaleweynaha Soomaaliyeed, waxay si joogto ah ugu howlgaleen dejinta qorshayaal lagu horumarinayo heerka aqooneed ee shaqaalaha si ay u noqdaan kuwa ka soo dhalaala doorka ay ku leeyihiin dhismaha dalka iyo barnaamijyada lagu sugayo masiirka dadweynaha oo ay deriseynta ka mid tahay, waxaana la diimooneyn in xoogsatada Soomaaliyeed oo ay si toos ah u saameyso ciriiriga dhaqaale bulsheed ee ay rajciyaddu ololeyneyso, ay xilligan u geyfan yihiin baheysiga xoogagga horusocodka ah ee kale si ay dharbaaxo naxariis la'aaneed ula beegsadaan kooxaha meheradda ka dhigtay cabburinta danyarta hayaanka ugu jirta xaqiijinta nolol sugan. Shaqaalaha Soomaaliyeed, wuxuu marxaladdan Kacaan toosineed uu safka hore kaga jiraa hirgelinta siyaasadda Xisbigu ka leeyahay deriseynta, waxayna ayagoo ku howlgalaya afkaartooda horusocodnimo ay ku sifoobeen gaarhayayaal, hanuuniyayaal iyo horseedayaal u adcega danta guud ee bu'shada isla markaana si nafhurnimo ah ugu diyaara inay bulshadooda midnimadooda iyo iskaashigooda bulshanimo, taasoo ay qaddarin kaga muteen halganka isdaba joogga ah ee ay shacbigeennu ugu jiraan gaaritaan nolol aayotiin leh.

Shaqaaleweynaha Soomaaliyeed oo ka shidaal qaadanaya go'aannadii kalfadhigii 2aad ee Golaha Dhexe XHKS, shirweynihii 3aad ee XHKS iyo guud ahaan awaamiirta ka soo baxday Xisbiga iyo dowladda, waxay iyagoo u maraya barnaamijka deriseynta ay dadaal adag ugu jiraan ka raarididda bulshada ku dhaqan degaannada kala duwan ee dalka waxa kala gudboon ololayaasha kordhinta wax soo saarka iyo kobcinta dhaqaalaha oo bartilmaameed u ah in la gaaro isku fillaasho taam ah oo xaqiijisa madaxbannaani dhaqaale oo lagaga kaaftoomo ku xirnaansho wax dibad laga soo waarido oo ah gunnimo qaran.

Shaqaaleweynaha Soomaaliyeed oo soo gabagabeeyey howlihii qabanqaabo ee sannad guuradiisii 11aad, Shirweynaha 3aad ee XGUSS iyo maalinta shaqaale weynaha adduunka 1da Maajo, waxay si muntidnimo leh heegan u yihiin inay gacan buuxda ka geystaan howl kasta ee lagu sugayo maslaxadda ummadda Soomaaliyeed, waxayna si aan ka weecasho laheyn u wajahayaan kooxaha ku howlan iney ciriiri geliyaan nolosha bulshada dan yarta ah.

Shaki kuma jiro in xoogsatada Soomaaliyeed 18 sano ku soo jirtay halgan kacaannimo ay maanta cududdooda midysan ay ku dhaqaayiyaan qorshaha horumarineed ee dalka, isla markaaa ay ku howlgeliyaan sidii caadada u ahaan jirtey niyad bira, hal abuur, waxqabad hufan iyo aragti horusocod oo ay ku xaqiijinayaan himilada ballaaran ee barnaamijka deriseynta ugu fadhiyo bulshada Soomaaliyeed.

Ka yimid Bogga 4aad

Silsiladda qaab dhismeed ee xarakada Shaqaalaha kadib 1969kii waxay la soo horumartay socodka waxqabad iyo abaabul ee dalka. Ma'fududa in si fikri iyo camaliba ah loo ebyo xarako shaqaale oo ka falgasha min goob shaqo ilaa heer qaran kuna dhisan habka dimoqaraadiyadda guddoonka dhexe, guulo iyo xisaabtan waa arrin taariikhda gashay.

U gogol dhigidda abuuris Ururro shaqaale wuxuu bilowday markii la soo gudbay wajiga 1aad ee Abaabulka xoogagga bulshadeed. xilliyadii wakiillada shaqaalaha ee Warshdaha iyo hey'adaha gaarka oo ka kooban min 3 xubnood. Dhinaca daryeelka. shaqaalihii hay'adaha ka shaqeyn jiray, waxaa lagu tallaabsaday in fasaxyadii la gaarsiiyoo 30 beri sannadkii iyo in heshiis wadareedkoodii iyo shuruucdii shaqo ee u yaallay fiiro loogu noqdo. Isla wakiillada hay'adahaas gaarka ah ayaa shir ku qabsoomay 1dii Sebtembar 1970kii Ex-fiyoore oo hadda ah hoyga Hobollada Waaberi, go'aanna ku gaaray inay 3 saacadood oo dheeri ah shaqaalaha Soomaaliyeed ay ugu deeqeen habka iskaa wax u qabso ee la joogteeyey taariikh ahaan waqtiga Kacaanka, halkaas ayey salka ku haysaa. Waxaa qaddarin mudan waxtarka weyn ee ay leeyihiin mashaariicda iyo barnaamijyada waxqabad ee laga fuliyey dalkoo dhan mabda'aas iskaa wax u qabso. Isla wajigan 2aad waxaa 29kii Disembar 1971kii, la xulay wakiilladii Shaqaalaha ee hay'adaha Dowladda oo ka koobnaa hal xubin mid kasta. Laantii shaqaalaha ee Xiriiska Siyaasadda waxay xoog saartay waxyigelinta, dhiirrigelinta, difaaca iyo tabaaridda wakiillada cusub, Sannooyinkii 1971, 72 iyo 73 ee wejigiisa 2aad shaqeynayey waxaa jiray iska hor imaadyo dhinac sharci iyo ilaalin shaqo Wasaaradda Shaqaduna qayb weyn ka qaadatay.

Intii u dhexeysey 1960 ilaa 1969 waxaa dalka ka jiray Ururro iyo xiriirro shaqaale oo dhinaca ka soo horjeedka maamul xumida iyo ujeeddada ka mideysnaa laakiin abaabul ahaan si buuxda isugu duba dhicin.

WAA SOCOTAA

HAMBALYO

1da MAAJO

Kaalinta XGUSHS ee Barnaamijka Howlgalka Xisbiga & Kacaanka Toosinta

DIYAARIYE: DR. BASHIIR MAXAMED JAAMAC «GOOBE»

Waa arrin aan ugub ku aheyn taariikhda halganka Kacaaneed ee Adduunka in ay mar walba soo ifbaxaan afafalayaal, hakadyo iyo marin habaabin badan ee lagu weecinayo itijaahooda horusocodnimo, taasoo lama huraan ka dhigta in lagala hortago dagaal aan naxariis laheyn ee lagu tirtirayo dhammaan hagardaamooyinka iyo dibindaabyada ay rajciyadda gudaha iyo dibedda maleegayaan si ay u meel-marsadaan maslaxaddooda gaar ahaaneed.

Bishii Juun 1985kii waxaa xoogagga waddaniga ah oo Soomaaliyeed u furmay bog cusub oo halgan, kaddib markii Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo ay u muuqatay xaaladda qallafsan iyo qallooca maamul ee dalka la soo dersay uu guddoomiyey dokumentigii dhaxalgalka ahaa ee Barnaamijka howlgalka Xisbiga iyo kacaanka toosinta.

Kacaanka toosintu wuxuu ka mid yahay noocyada kacaannada adduunka oo dilaa hadda waxtarkiisa iyo wax ku oolnimadiisa aadamigu waaya arag u yahay, xag aragti iyo ficilba, waxaana noocaas kacaaneed kaga duwan yahay Kacaannada kale ayadoo kacaannada kale ay yihiin kuwo ka dhasha halgan qaraar, oo xoogagga horusocodka ah ay ku ridayaan xukuumadaha gurracan oo talada dalka haystay, waana Kacaanno ku dhasha dagaal hubeysan ama mid si nabadgelyo ku yimaada.

Hase yeeshee Kacaanka toosinta, oo aan ka ahmiyad yareyn kuwa kale, wuxuu ku yimaadaa qaab sixitaan, ayadoo si qoto dheer oo geesinnimo leh lagu wajahayo weecasho iyo hakad ku dhaca socodka kacaaneed, ayna kalliftay ama lama huraan noqotay in wax qabadkiisii dib loogu hoggaamiyo ayadoo xoogga la saarayo kor u qaadidda tayada howlgalka Xisbiga iyo ku dhaqanka shuruucdii uu dalka u dejiyey.

Guddoominta XHKS ee Barnaamijka Howlgalka Xisbiga iyo Kacaanka Toosinta oo aan ka ahmiyad yareyn Curashadii Kacaanka 21ka Oktoobar 1969, waxaa looga jeedaa in dib loo saxo fal kasta oo khalad ahaan looga galay Barnaamijka Xisbiga iyo guud ahaan ku dhaqanka shuruucda dalka, xagga siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka, bulshada iyo nolosha

dadweynaha.

Kacaanka toosinta, waxaa kale oo ahmiyad gaar ah uu siinayaa sixidda nolosha gudaha Xisbiga oo uu ku meelmarinayo adkeynta hoggaamintiisa bulshada gaar ahaan sixitaanka khaladaadka ka jira dhinacyada dowladda iyo ururrada bulshada xag maamul iyo xag dhaqaaleba.

Kacaanka toosinta ee aynu jideysannay meelmarintiisa, wuxuu leeyahay cadowyo gudaha iyo dibaddaba, sida caadada kacaannada horusocodka oo dhan la soo guboonaata waana kuwii aan horay u naqiin, kana gacan sarreynay, isla markaasna naqaan dabeecadaha ay leeyihiin waxa ay doonayaan, cidda ka dambeysa ee ku sugeegata iyo xataa shakhsiyaadka ay yihiin.

Kacaanka toosintu waa joogto, wuxuu leeyahay bilow dhammaadse ma leh, wuxuuna ku socon doonaa qorshe cilmi iyo daraasad qota dheer oo loo adeegsanayo wejiyo kala duwan uga dhaqan galaya qaybaha nolosha bulshada,, iyadoo XHKS uu bud-dhige u yahay socodsiintiisa .

Dadweynaha Soomaaliyeed oo dhammi oo uu shaqaaleweynuhu hormuud u yahay waxay ku qiirsadeen go'aanka Kacaanka toosineed ee dalka laga ambaqaaday iyadoo XHKS ka tarjumayo doonista iyo rabitaankooda isla markaasna waxaa guusha Xisbiga iyo fulinta ujeeddooyinka Kacaanka bud dhige u ah, sida xoogagga waddaniga ah iyo dadweynuhu ficil ugu beddelaan baaqa Xisbiga iyo ku mintidka dhaqangelinta dhinacyada kala duwan ee Kacaanka toosinta.

Xoogsatada Soomaaliyeed waxay kaalin horseednimo ka soo qaateen dhaqdhaqaaqii gobannimadoonka ee lagu xaqiijinayey madaxbannaanida siyaasadeed ee geyigeenna, isla markaasna waxay ahaayeen xoogaggii waddaniyiinta ahaa ee garab taagnaa ciidammada qalabka sida ee horseedka u ahaa dhalashadii Kacaanka libineed ee 21ka Oktoobar 1969.

Haddaba, kacaanka 21kii Oktoobarna asagoo garwaaqsan kaalinta lixaadka leh ee shaqaaluhu ka qaadan karaan horukaca nolosha maaddiga iyo tan ruuxiga ah ee bulshada, awoodna u leeyihiin in ay dhisaan nolol cusub oo aan qofna qof ku dul nooleyn ayuu ku dhaqaaqay, tallaabooyin cad cad oo lagu daryeelayo danaha guud ee bulshaweynta, xagga xuquuqda, waxbarashada, horumarinta wax soo saarka, abaabulkooda, ballaarinta awooddooda iyo soo saaridda sharciyo faa ra badan oo dhammaantood u suurta gelinaya in ay si buuxda uga qayb qaataan hoggaaminta siyaasadeed ee dalka.

Shaqaaleweynaha Soomaaliyeed, xuska 1da Maajo waxaa ugu mataaneysan sannadguuradii 11aad ee dib u habeynta Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed oo door weyn ka soo qaatay abaabulka iyo mideynta wacyiga shaqaalaha, iyo shirweynaha 3aad ee Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, waxaa xuskoodu ku soo beegmay waqti si xoog leh loogu jiro dhaqan gelinta wejiga 3aad ee barnaamijka howlgalka Xisbiga iyo kacaanka toosinta oo biya dhiciisu yahay xogogaal u noqoshada dhibaatooyinka dhaqaale iyo bulsho ee dalka jira.

Shaqaaleweynaha Soomaaliyeed oo garowsan doorkooda hoggaamineed ee ay ku leeyihiin horumarinta bulshadooda, isla markaasna maanka ku haya abaalka aan la gudi karin ee kacaankoodu u galay ayaa isku waajibiyey habsami u hirgelinta barnaamijka howlgalka Xisbga iyo kacaanka toosnta oo dan yarta loogu daneynayo isagu uu horseedka u yahay.

XGUSHS oo ka ambaqaadaya barnaamijkaas taariikhiga ah iyo xeerka XHKS wuxuu si mintidnimi iyo firfircooni leh uga qayb qaataa halganka lagu ciribtirayo rajciyadda iyo qabbaankooda iyo shucuub kasta oo lagu waxyeeleynayo wadajirka iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed iyo waxyeellada miraha Kacaankooda ay ku diirsadeen baaqa XGUSHS wuxuu yahay ballanqaadid ku wajahan in xoogsatada Soomaaliyeed ay isku waajibiyeen marxaladda wejiga 3aad ee barnaamijka howlgalka Xisbiga iyo Kacaanka toosinta oo ku soo beegantay munaasabadaha qaaliga ah ee is biirsaday in ay dhowr jibbaaraan wax qabadkooda, gaar ahaan xoojinta wax soo saarka, la dagaallanka maamul xumida, xatooyada xoolaha ummadda, ma shaqeystenimada iyo caddaaladdarrada bulshadeed.

Xiriirka Dibada ee XGUSHS

DR. ISAAQ KHALIIF FAARAX

Waxaan qormadeennii hore ee Warpeyska DHAMBAAL, akhristayaasheenna ugu soo bandhignay qeyb yar oo kooban ee ku saabsan dhaqdhaqaaqa Xiriirka Guud Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed ee dhinaca Xiriirka Dibedda. Haddaba waxaanu halkan idiinkugu soo gudbineynaa doorka xiriirka dibadda XGUSHS oo u qaybsama sidan:-

Iyadoo laga shidaal qaadanayo Xeerka iyo Barnaamijka XGUSS, wuxuu si fircoon uga qeyb qaatay dhaqdhaqaaqa caalamiga ah ee Xoogsatada Adduunka ugu jirto xoojinta midnimadooda iyo isgarabsigooda, isla markaasna ay ku daafacayaan xuquuqdooda shaqaalenimo iyo daryeelka noloshooda, halgankaas shaqaalenimo waxaa lagu baadigoobayaa xaqiijinta ujeeddooyinka iyo himilooyinka ay xoogsatada adduunku higsanayso, kuwaasoo ka tarjumaya danahooda asaasiga ah. sida helitaanka shaqada, mushaharooyinka wanaagsan, hagaajinta xaaladaha shaqada, horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada, sugitaanka nabadgelyo iyo xasilooni waarta dimoqaraadiyad, ciribtirka imbeyaaliyadda, gumeysiga, midabtakoorka iyo Sahyuuniyadda.

URURKA SHAQADA ADDUUNKA (ILO) IYO XGUSS

XGUSS oo kaalin wax ku ool ah kaga jira xubinna ka ah Ururka Shaqada Adduunka (ILO) waxaa loo doortay shaqaale weynaha Soomaaliyeed sannad ka dib Shirweynihii 2aad ee dib u habeynta XGUSHS, inuu xubin buuxda ka noqdo Golaha Maamulka ee Ururkaas.

XGUSS. oo sannad kasta ka qeyb gala Shirka ILO, waxaa la isku dayey in xubinnimadii Golahaas nalaga qaado bacdamaa Guddoomiyihii hore ee XGUSS Jaalle Cabdullaahi Maxamed Mire Qaranku u magacaabay xil Dowladeed.

Kaalintaasi si aysan uga lumin shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu Xiriirka Guud u howgalay sidii uu u xaqiijin lahaa xubinnaas qaaliga ah ee uu caalamka shaqaalaheenna kaga helay sumcad iyo qaddarin aad u qoto dheer.

Shirweynihii 73aad ee Ururka Shaqada Adduunka oo lagu qabtay magaalada Jineefa 3—23.6.87. kana qeyb galay wafdi seddex geesood ah ee dalkeenna matalayey kuwaasoo ka kooban:- Xiriirka GUSHS, Asaaradda Shaqada iyo Rugta Ganacsiga warshadaha iyo Beeraha. Wuxuu XGUSS

mar labaad ku guu'eystay in loo doorto xubinnimadii Golaha Maamulka ee ILO ilaa sannadka 1990ka jagadaas XGUSS, wuxuu u doortay in uu shaqaalaha Soomaaliyeed matalo Jille Cali Ibraahim Maamed, waxaanuna ku helnay cod dhan 93 oo ka mid ah 120 cod oo wax dooran karay, marka lagu dhereriyo labada dowladood ee dunida ugu xoogga weyn waanu ka sarreynay.

laafaadka iyo kooxeysiga muddada soo jirtaamayey ee ku dhexjiray Hoggaamiyayaasha Ururkaas oo ay durbaanka u tumayeen kooxo shisheeye oo ujeeddadoodu aheyd qeybi oo xukun.

Si a la wada ogyahay khilaafaadka Ururka waxaa uu bilowday Shirweynihii 4aad ee lagu qabtay Magaalada Lagoos ee

KAALINTA XGUSS EE URURKA MIDEYNTA URURRADA SHAQAALAHA AFRIKA (OATUU)

XGUSHS, wuxuu xubin firfircooon ka yahay «OATUU» oo xaruntiisu tahay magaalada Akra «Gaana», wuxuuna ka qeyb galaa Shir sannadeedka Ururkaas oo had iyo jeer lagu qabto dal ka mid ah dalalka Afrika.

Gumeysiga iyo imberyaaliyadda caalamiga ah oo had iyo jeer ku howlan inay kala dhantaalaan midnimada iyo halganka Shaqaalaha Afrika, waxay ka dhex abuureen khilaafaad xubnaha Ururkaas iyo hoggaamiyayaashoodaba.

Arrintaasi si looga hortagana waxaa laysugu yimid shirweyne aan caadi aneyn oo ay ka soo qeyb galeen dhammaan xubnaha OATUU si xal loogu helo khi-

dalka Nayjeeriya bishii Jannaayo 1985kii, waxayna sii xumaadeen oo heer ba'an oo laba kooxood loo kala jabay gaareen Febaraayo 1986kii, markii leysugu yimid Shirweynihii 1aad ee aan caadiga ahayn ee magaalada Akra ee dalka Gaana.

Kala jabkaas Hoggaamiyayaasha Ururka ku dhacay iyo halista uu jiritaanka Ururku galay, waxaa lagaga dooday shirkii Wasiirrada Shaqada ee Abriil 1986kii, la guna qabtay Addis Ababa dalka Itoobiya, waxaana halkaas lagu magacaabay Guddi dhexdhexaadin ah oo ka koobma:— Koongo, Masar, Itoobiya, Zambiya iyo Biniin. Guddiga dhexdhexaadintu wuxuu dhawr jeer isugu yeeray labada kooxood ee is—heystay si ay u dhexdhexaadiyaan, waxaana laga fursan waayey in Addis Ababa lagu qabto Shirweynihii 2aad ee

aan caadiga ahayn ee OATUU muddada u dhexeysay 24—26 10.86, qabashada shirweynahaas waxaa loo xilsaaray, Guddigii dhexdhexaadinta ee shanta dal Wasiirradooda shaqada oo lagu biiriyey 6 wakiillo Urur Shaqaale oo seddexba ay koox mataleyso.

XGUSS, wuxuu ka mid ahaa Ururradii shaqaale ee qaban qaabada shirweynahaas loo doortay, wuxuuna muujiyey kaalin horseednimo oo taariikhda halganka shaqaalaha Qaaradda Afrika baal dahab ah ka galay.

Arrimihii saldhigga u ahaa khilaafaadkuna waxay ahaayeen wax ka bedelidda xeerka cod bixinta doorashada hey'adaha hoggaaminta Ururka; Shirweynahaas wuu ku dhammaaday guul iyo isafgarad, waxaana lagu doortay Guddiga Fulinta Ururka oo ka kooban:—

— Hal Guddoomiye (Liibiya)
— Hal Xoghaye Guud (Nayjeeriya)
— 13 Guddoomiye ku xigeen
— 6 Kaaliye Xoghaye Guud
— Hal Khasnaji Guud
— Hal Kaaliye Khasnaji Guud.

XGUSS waxaa loo doortay Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee OATUU, oo uu jagadaas hayey tan iyo 1976kii, waxaana haya xilkaas Cali Ibraahim Maxamed.

Waxaa kaloo XGUSS ka qeyb galay kaalin firfircoonna ka qaatay 1980 — 88ka.

1. Shirkii 10aad ee Wasiirrada Shaqada Afrika (OAU labour Commission) oo lagu qabtay magaalada Caruusha ee dalka Tansaaniya Abriil 1987kii, Shirkaas waxaa Qarankeenna u matalayey wafdi heer sare ah oo ka kooban XGUSS, Wasaaradda Shaqada, waxaana Soomaaliya shirkaas loogu doortay xubin suge Golaha maamulka ee ILO.

Waxyaabaha muhiimka ah ee Shirkaas ka soo baxay waxaa ka mid ah in Urur Shaqaale ee Qaran kasta uu abuuro santuuq waxbarasho shaqaale, taasoo ka duwan dhigaalka caadiga ah ee Santuuqa Shaqaalaha.

2. Kalfadhiga 10aad ee OATUU ee Guddiga Dhexe oo lagu qabtay magaalada Qaahira dalka Masaarida Maajo 87kii, ajendaha ugu muhiimsan ee Kalfadhigan wuxuu ahaa xulka musharixiinta Ururrada Shaqaalaha ee Afrika ee la horgeyga lahaa shir sannadeedka 73aad ee ILO, si loo doorto Golihiisa Maamulka muddada u dhexeysa 1987—1990ka. Si xulka musharixiinta loo meel mariyo dalalka Afrika waxaa loo qeybiyey shan kooxood iyadoo ay JDS, koox la aheyd, Dalalka Kenya, Itoobiya, Suudaan, Tan-

saaniya, Ugaandha, Burundi, Jabuuti, Komoro iyo Sishilis, 10kaas waxay wadaagaan hal kursi (Xubin buuxda) iyo Xubin suge, keyd ah, waxaana sida la xusuusan yahay jagooyinkaas horay u soo kala hayey Ururrada Shaqaalaha Soomaaliya iyo Jabuuti, dadaal ka dib, XGUSS wuxuu ku guuleystay inuu mar labaad isu soo sharraxo jagadaag in kastoo dalal ay Kenya iyo Itoobiya ka mid yihiin isku dayeen inay ka hor yimaadaan, haddana taageerayaasha XGUSS ayaa ka cod batay, jagadii xubin sugenimadana waxaa mar labaad ku soo laabtay JABUUTI.

WAA SOCOTAA

HAYAAN «hees»

MUUSE XAAJI SACIID



Alla Haydin Daayee
Haween iyo raggiinuba
U hagaaga hawlaha
Waa lama huraane
Iyo horumarkeen
U hanuunsanaada
Arligiisa hooyo
Nimaw hagar baxayne
Beela kale hubka u sida,
Wallee weynu heliyoo
Hoog baw dambeeyee
Horuu wada hayaanka.
Hindisada hoggaanshaha
Haday naan u kala harine
Hareeraha isla qabanoo
Hagrashada ka deyno
Dhulku hodon inuu noqon
Waa halan humnaay

Hurdo haybad beeshaye
Ninkii hawsha diidoo
Ku hamiya hambiyo hoo
Walle weynnu heliyoo
Hoog baw dambeeyee
Horuu wadaa hayaanka.
Hud-hud kiyo hangaranlaa
Ham-ham liyo afmiinshaar
Hayb haybta hishadoo
Hurinaaya beenta
Waa wixii naheeraye
Waa inaan horjoognaa
Horarada hamuumee
Himbirir sanaaya
Midka noo hodaayana,
Wallee weynnu heliyoo
Hoog baw dambeeyee
Horuu wad ahayaanka.

MA OGTAHAY

DR. DAAHIR CALI CUMAR (DEYR)

Qodobbadan MA OGTAHAY wuxuu ku saleysan yahay taariikhdii dhaqdhaqaaqyadii gobannimadoonka Soomaaliyeed qaar ka mid ah, gaar ahaan dhacdooyinka aan lagu baahin raadiyayaasha iyo wargeysyada.

1. Ma ogtahay akhristow in 25kii Maajo 1885kii ninkii Talyaaniga ahaa oo horseedka u ahaa gumeysigii Talyaaniga ee Koonfur Soomaaliya oo la oran jiray Antoniyo Jeeki (Antonio Ceechi) iyo Suldaankii Sansibaar Sciid Barqash ay kala saxiixdeen heshiis ka kooban 15 qodob oo ku saabsanaa in Talyaaniga ka ganacsado Dekedihii Baraawe, Marka, Muqdisho iyo Warshiikh, taasina markii dambe isu rogtay gumeysi.
2. Ma ogtahay in horseedihii gumeysigii Talyaaniga Antonyo Jeeki iyo Saraakiil kale oo badan oo uu hoggaaminayey 25 Nofembar 1896 lagu laayey Lafoole, iyagoo u socda Degmada Afgooye.
3. Ma ogtahay in degmada Luuq ee Gobolka Gedo ay tahay tii ugu horreysay meel si rasmi ah loo gumeysto dalka Jamhuuriyadda, lana qabsaday 1895kii Luuq wuxuu Talyaanigu ku qabsaday xoog ee ma ahayn maxmiyad ama protectorato sidii meelo badan oo dalka ka mid ah lagu qabsaday.
4. Ma ogtahay 3dii Jannaayo 1499kii in Dalmareenkii Bortuqiiska ahaa oo la oran jiray (Vasco Dagama) uu magaalada Muqdisho madaafiic ku furay, kaddib markii dadkii Soomaaliyeed u diideen inuu soo galo magaaladda, maxaa yeelay ninku wuxuu watay markab ciidan, Indheer garadkii Soomaaliyeed waxay istuseen, haddii ragga wata markabka dagaalka ay soo galaan ciidda Soomaaliyeed armaa laga saari waayaa, sidaas darteed waa u diideen inay ciidda cagaba soo dhigaan.
5. Ma ogtahay in 1506dii ciidammo Bortuqiis ah oo uu hoggaaminaycy Dhamme (Trista De Guunha) oo watay 16 markab iyo dadkii Soomaaliyeed ee ku noolaa Baraawe dagaallo toddoba beri socday uu dhex maray. Mase ogtahay in ciidammadii Bortuqiiska laga dilay 40 nin lagana dhaawacay 60 nin.
6. Ma ogtahay in Talyaanigu 1885 — 1908 intii u dhexeysay uu gaari kari waayey degmada Afgooye dagaalladii gumeysi caabbiga ahaa ee Soomaaliyeed dartood, mase ogtahay in dagaalladaas lagu dilay boqolaal kun oo Soomaali ah.
7. Ma ogtahay in Soomaaliya lahaan jirtay tariin isaga goosha Muqdisho — Afgooye — Jowhar oo jidka uu maro dhererkiisu ahaa 113 kiilomitir, mase ogtahay in 1941kii ciidammadii Ingiriiska ee qaybsaday Koonfur Soomaaliya ay tarteen birihii tareenka, matoorradii iyo qalabkii kale ee tareenka oo ay geeyeen dalka Kiinya oo waagaas u haysteen in uu yahay gobol ka mid ah dalkooda.
8. Ma ogtahay in 1823kii, nin Ingiriis ah oo la oran jiray «William Owen» uu damcay inuu Muqdisho ka sameeyo maxmiyad ama Protectorat, mase ogtahay in Soomaalidii ku noolayd Muqdisho ay diidday.
9. Ma ogtahay in 1935kii xeer lagu dhaqi jiray ciidammadii Liibiya, Eritereya iyo kuwo kale Fashiistadii Talyaanigu damacday inay ku dhaqdo Soomaaliya kaasoo ku saabsanaa dilid jeedal ama shaabuug, mase ogtahay in markii dambe Soomaaliya laga joojiyay, kaddib markii askartii Soomaaliyeed nin ka mid ahaa oo la oran jiray «Axmed Ciise Gurey» uu dilay sarkaalkii Talyaaniga u qaabbilsanaa anshaxa ama dishibiliinka ciidammada oo markii hore lagu kari waayey jooji sharcigaas. Soomaalidu ma oggolaan doonto in oogadooda lagu dhufto jeedal.

Garyaqaankii la dilay waxaa la oran jiray labo Xiddigle «Mireia», mase ogtahay in markii Soomaalidu dishay xeer ilaaliyihii ciidammada in Baarlamaankii Talyaanigu Soomaaliya ka joojiyay dilkii shaabuugga.

10. Ma ogtahay in 1926kii ceel Xaaji oo ka tirsan Degmada Marka dagaal

weyni ku dhex maray gumeysigii Talyaaniga iyo Xir Quraan Soomaaliyeed. oo tiradoodu ahad 340 qof in ka badan, maxaa yeelay intaasi waa inta ku qoran buugtii Fashiistada in ka badan 200 oo qofna waxa lagu xiray xabsiga weyn ee Muqdisho. Dagaalka waxaa sabab u ahaa Fashiistada oo rabtay in beerihii webiga Shabeelle agagaarkii sa laga wadey oo Soomaa'ida khasab lagaga dhigay in Xirtu ka qayb gasho kaddibna ay diidday kalooniyadii.

11. Ma ogtahay in 1925 — 1927kii dagaallo lagu hoobtay uu ddexmaray gumeysigii talyaaniga iyo Boqoortooyadii Gobolka Bari, mase ogtahay in dagaalkaas bishii febaraayo 1927 gumeysigii talyaanigu ku guuleystay, mase ogtahay dadkii Soomaalida kaga dhintay ee talyaanigu buugta ku qoray ay dhan yihiin 1330, laguna dhaawacay 757. Intaani waa askartii boqortooyada, waxaase boqol jeer ka badan dadweynihii la diley ee aan cidi tirin, maxaa yeelay cadowgu wuxuu madaafiic maraakiib laga soo ridayey ku wada burburiyey magaaloo yinkii ka dhisnaa badaha Hindiya iyo tan guduudan ama cas.

WAA SOCOTAA

Yaa Naqan Karo Hogaamiye Shaqaale

DAAHIR CALI CUMAR (DEYR)

Ma fududa si tilmaan ku habboon looga doxiyo qofka noqon kara hoggaamiye shaqaale, maxaa yeelay marka uu xilkiisa garto, waa hoggaamiye Qaran. Inkasta oo aan fileyno in wax badan laga faallooday, haddana waa lagama maarmaan in aan tusaale kooban ka bixino, mar haddii maanxdii shaqaalaha qaar ka mid ah ay isugu iman doonaan shirweynaha saddexaad ee Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Hoggaamiye shaqaale wuxuu leeyahay xil iyo aragti ka duwan hoggaamiyaasha kale, maxaa yeelay waxaa xil ka saaran yahay shaqada guud ee dalkiisa iyo dadkii fulinayey hawlaha kala duwan.

Haddaba, waxaa isweydiin leh qofka xilkaas culus ee labada weji oo mid kasta

leeyahay qorshihiisa, fulintiisa, kormeerkiisa, hubintiisa, horumarintiisa, dabagalkiisa, xisaabtankiisa iwm. maxaa laga rabaa inuu noqdo?

Inta aanan u gudbin warcelinta weydiinta qodobkan, waxaan akhristayaasha u furiimineynaa in qoraalku noqon doono qodobbo kooban oo ka fog falsafad iyo siyaasad.

1. Hoggaamiye shaqaale waa in uu noqdaa mid ku dhex barbaaray shaqada iyo shaqaalaha oo aqoon iyo waayo aragnimo u leh labadaas arrimood, maxaa yoo lay hadduu noqdo mid siyaasadi keentay oo aan la socon xeerarka iyo qorshayaasha, waxaa taariikhdu na bartay in uusan ku guuleysan karin xilkiisa.

2. Waa inuu noqdaa qof la hubiyey heerka uu ka joogo kalgaceylka iyo jaceelka ee uu hayo dalkiisa iyo dadkiisa.

Haddii uusan dareenkiisu aheyn mid uu ku saleysan yahay arrintaas ma noqon karo hoggaamiye shaqaale hadduu noqdase waxaa hubaal ah inuusan wax ka qaban karin labada qodob ee kala ah: Shaqada iyo shaqaalaha, gaar ahaan tan danaha shaqaalaha oo ah xubinta ugu weyn xilkiisa.

Midda kale waxaa jira arrimo guud oo uu qayb ku leeyahay, waxaana ka mid ah: badbaadinta dhulka iyo qaranka marka cadow soo weeraro, dhul gariir iyo abaaro, cudurrada halista ah, sida: daacuunka, duufaanno, dhibaato biyo iwm. haddii uusan ahayn qof ay ku weyn tahay waddanlyaddu ma gudan karo kaalinta uu ku leeyahay wax ka qabashada arrimahaas.

3. Waa in uu yahay qof wuxuu rabo si cad u jeedin kara oo qoraal iyo af hadbkii loo baahdo ku cabbiri kara dareenka guud ee shaqaalaha. Qodobkan waxaan uga jeedna, hoggaamiye shaqaale waa in uusan noqon mid jilicsan oo aan laga dareemin qabow, haddii kale waxaa ku tumanayaa kuwa jecel inay cunaan xuquqda shaqaalaha oo aan garan inaan horumar cidina gaari karin shaqaale laaantii.

4. Hoggaamiye shaqaale waa inuu yaqaan sharciyada lagu maamulo shaqada iyo shaqaalaha, si aan arrin qof shaqaalaha ka mid ah wax uu xaq u leeyahay looga boobin ama looga duudsiyin. Midda kale marka uu fulinayo dano shaqaale, hadduusan aqoon fiican u lahayn heshiisyada dhexmara shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, sharciyada, qorshaha muddada dheer iyo kuwa muddada gaaban, sharciyada badbaadada shaqaalaha, waxaa taariikhdu sugtay inuusan ku guuleysan karin fulinta xuquuqda shaqaalaha.

5. Waa inuu noqdaa qof awood u leh barashada dabeecadaha kala duwan ee shaqaalaha, sida la ogyahay shaqadu waxay u kala baxdaa labo, kuwaas oo kala ah; Shaqada muruqa iyo maskaxda (Physical Work and Mental Work) labadaas qaybood mid kasta waxay leedahay dabeecad shaqo oo u gaar ah oo u baahan in la yaqaan dhibaatooyinka shaqo ee ay kala leeyihiin iyo danaha ay kala yeelan karaan labada qof ee ku kala howlan.

Tusaale ahaan, qofka ka shaqeynaya warshadda biraha shubta ama tan dharka sameysa iyo qofka cilmi baaraha ah ama baraha ah, qof kasta waa garan karaa sida ay u kala durugsan yihiin dabeecaddooda shaqo, sida shaqadoodu u kala fogtahay baa dhibaatooyinka shaqooyinkuna u kala duwan yihiin.

1. Dadka ka shaqeeya warshadaha shamiintada ama sibirka, dharka biraha, rinjiga, daawooyinka iwm, waxaa ku dhaca cudurro kala duwan oo ay ka mid yihiin Qaaxada, neefta, sanboorka, Qumanka iyo kuwo kale oo badan.

Sidaas darteed hoggaaminta shaqaalaha ee goob shaqo waa inuu yaqaan ka hortagga cudurradaas iyo arrimaha kale ee danaha dadka shaqadaas haya ay leeyihiin. Waa suuragal in maamulka hay'adahaas ay oggolaadaan marka heshiis la kala saxiixanayo, hase yeeshee ka dib aan loo dhaqangelin sidii loo baahnaa. haddaba waxaa hoggaamiye yahay goobtaas lagama maarmaanka ku ah inuu kormeer joogto ah ku sameeyo sida loo fuliyey danaha shaqaalaha.

2. Qofka maskaxda ka shaqeeya waxaa ku dhaca cudurro ka duwan kuwa ku dhaca dadka ka shaqeeya muruqa, kuwaas oo noqon kara Indhabeel, Sonkorow ama Kaadi macaan, Dhiig kar, cagaar show, kaadi qabasho, shabeel ama Eerno, waalli, gaastiriiko, tuf ama romatisim, xidid qalal, dhiig bax geeri dhaliya iyo kuwo kale badan.

Haddaba waxaa hoggaamiyaha shaqaalaha ee goobta shaqo lama huraan ku ah inuu aqoon u leeyahay ka hortagga dhibaatooyinkaas iyo markii la arko qaar ka mid ah cudurradaas, waa inuu karti u leeyahay uu ku badbaadiyo bukaha.

6. Hoggaamiye shaqaale waa inuu bartaa dabeecadaha kala duwan ee shaqada, kaasoo ah qodob lagama maarmaan ah, maxaa yeelay waxaa jira qof cayaar badan iyo mid neceb, mid hadal iyo kaftan badan iyo mid dhibsada, mid shaqo badan iyo googooya, mid balwad badan oo aan isku filleysiin mushaharkiisa oo had iyo jeer deyn qaadasho iyo baryo badan iyo mid wixiisa dhaqaaleysta, mid dagaal badan iyo mid deggan, mid naxariis badan oo had iyo jeer jecel in dadka jiita gacan la siiyo iyo mid aan dankaas ka lahayn, mid been badan iyo mid ka xishooda wax aan la hubin, mid shaqada ku liita, hase yeeshee ku fiican abaabulka shaqaalaha ee kale, sida maadeysyada, shirarka shaqada, soo dhaweynta martida, ciyaaraha shaqaalaha iwm iyo mid shaqadiisa oo keliya ilaashada, mid kiciya shaqaalaha oo dhibaatooyin aan jirin abaabula mar kasta iyo mid damiya, mid u dhashay tabar ari oo aan lahayn xumaato, hase yeeshee shaqadiisa laga eedsheegto, mid hurdo badan oo had iyo jeer shaqada ka dib dhaca, marka uu joogase ka adag shaqadiisa. Taasoo hoggaamiyaha u fududeyneysa marka qof shaqaalaha ka mid ah arrin lagu soo eedeeyo, hoggaamiyaha waa u fududahay sidii uu wax uga qabar lahaa eedeynta lagu soo oogay xubinta ka mid ah shaqaalihiisa, hadduu horay u kala bartay dadkiisa dabeecadahooda.

7. Hoggaamiyaha shaqaalaha ee goob shaqo waa inuusan noqon mid ku kooban oo keliya daanaha shaqaalaha ee heerka koowaad, sida ilaalinta mushaharooyinka, fasaxyada, jirrooyinka shaqada laga qaado, dharka shaqada iwm ee waa inuu noqdaa mid yaqaan heerka labaad ee danaha shaqaalaha, sida xirfad kordhinta, hoyga, cayaaraha ama isboortiga goob shaqo, abaalmarinnada kala duwan, sameyn makhaayado iyo caweyso nasasho shaqada ka dib, kulamo aqoon isweydaarsi, goobaha caafimaadka deg degga ah, gaar ahaan warshadaha iwm.

8. Hoggaamiye shaqaale waa inuu yahay qof aaminsan shaqadiisa oo marka laga hadlayo dano shaqaale, waa inuu yahay mid aan la leexin karin oo aan oggolaaneyn inuu galo jeebka loo shaqeeyaha.

9. Hoggaamiye shaqaale waa inuu yahay qof adkeysi badan oo u dulqaata cayda, masabidka, mararka qaarkood dagaal loola yimaado, been iyo shirqool lagu xiro iwm.

WAA SOCOTAA